Xafiiska
Guddoomiyaha Gobolka

Lam. 49 FY 19/20
TAARIIKHDA Abril 29, 2020

AMARKA SI BADBAADSANI LOO JOOGO GURIGA

IYADA OO LA OGAA, inaan anigu ku dhawaaqay xaalad degdeg ah inay ka jirto gobolka markay ahayd Maarso 15, 2020 iyo xaaladdii degdegga ahayd oo dib loo cusboonaysiiyay markay ahayd Abril 14, 2020 si loo fasaxo isticmaalidda awoodaha xaaladaha degdegga ah iyo sidii loo fidin lahaa oo loo dedejin lahaa ka falcelinta gobolka ee ku wajahan khataraha daran ee caafimaad iyo ka badbaadka cudurka aadka la isku-qaadsiiyo ee COVID-19; iyo

IYADA OO LA OGAA, intii u dhaxeysay 18kii Maarso iyo 3dii Abril inaan anigu soo saaray Amarrada Fulinta 14, 19, 28 iyo 34 FY 19/20, sababaha iyo awoodahaas ku xusan arrintaas dartood, in la soo rogay illaa Abril 30keedii qawaaniin degdeg ah qaarkood iyo xaddidyo lagama maarmaan u ah in laga falceliyo COVID-19; iyo

IYADA OO LA OGAA, inay lagama maarmaan u tahay in la dheereeyo taariikhaha ku dhaqanka Amarradaas si loo dhawro caafimaadka dadweynaha iyada, isla waqtigaas la hirgalinayo hal ku dhigga *Wadajir Waxaan Nahay Reer Maine: Dib-u-bilaabidda Qorshaha Dhaqaale ee Maine (halkan inta ka dambeysa la oran doono Qorshaha Dibu-Bilaabidda)*, markay tahay nidaam qorshaysan oo lagu ogaanayo sida xaddidyada qaarkood ee meheradaha iyo waxqabadyada ay si badbaado leh oo si tartiib-tartiib ah xaddidka looga dabciyo;

HADDABA, SIDAA DARTEED, Aniga oo ah, Janet T. Mills, Guddoomiyaha Gobolka Maine, iyada oo la raacayo 37-B M.R.S. Ch. 13, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn awoodaha lagu sheegay Ku Dhawaaqyada iyo Amarrada kor lagu sheegay, ayaan halkan ku Amarayaa sida soo socota:

I. UJEEDDO

Ujeeddooyinka Amarkan ayaa ah in la sii wado oo ahmiyadda la siiyo ilaalinta caafimaadka iyo badbaadada dadweynaha iyadoo la sii haysto qaar ka mid ah tallaabooyinka badbaadada dadweynaha ee hadda jira looguna talagalay meheradaha iyo waxqabadyada shaqsiyadeed illaa iyo

Mey 31, 2020 iyo in la hirgaliyo *Qorshaha Dibu-Bilaabidda* si loo qiimeeyo sida xaddiyada qaarkood in laga yaabo, iyada oo la jaan qaadaysa tilmaamaha caafimaadka bulshada ee khubarada, in si badbaado leh xaddidka looga dabciyo oo loo oggolaado in ka badan waxqabad dhaqaale iyo iyo shaqsiyeed ah.

II. AHMIYADDA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA OO SII SOCOTA

Ilaalinta caafimaadka dadweynaha iyo nadaamkeenna bixinta daryeelka caafimaadkaa ayaa sii lahaanaya ahmiyadda kowaad. Agaasimaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (DHHS) iyo Agaasimaha Xarunta Maine ee Xakameynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC) ayaa sii wadi talooyinka ku saabsan jahooyinka iyo hab-cabbirrada cudurka COVID-19 si loo hago wakhti ku beegnaanta, xawaaraha iyo baaxadda wixii kasta ee ka dabcinta xaddiyada haatan jira ah. Maine CDC ayaa hadsa raadraacda, iyada oo la beddeli karo, seddex hab-cabbirro:

A. Hoos u dhac cudurrada hargabka-oo-kale ah iyo xaaladaha sida cudurka COVID-oo-kale ah;

B. hoos u dhac kiisaska la diiwaangeliyay iyo bukaannada cusbitaalka dhawaanta la jiifiyay ah; iyo

C. Qaaditaanka nidaamyada isbitaal ee Maine inay dawayaan dhammaan bukaannada bilaa daryeelka masiibada iyo kartida u gobolku u leeyahayinu fuliyo barnaamij k tijaabin cudur oo firfircoon.

III. AMARRADA FULINTA HAATAN JIRA OO LA DHEEREEYAY

Si loogu sii wado ilaalinta caafimaadka dadweynaha, taariikhaha hirgalka Amarrada Fulinta 14, 19, 28 iyo 34 FY 19/20 ayaa lagu dheereynayaa halkan illaa Mey 31, 2020 haddii mar intaa ka dhow xeer ahaan lagu beddelin mooye. Dhammaan xeerarka kale ee sida amarradan oo kale ah ayaa shaqaynaya oo hoos imanaya hagitaan u fasirasho. Hagitaankan oo kale waxa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, hirgelinta *Qorshaha Dib-u-Bilaabidda*, ugu ku daray Amarkan tixraac ahaan.

IV. MARXALADAHA QORSHAHA DIB-U-BILAABIDDA

Laga bilaabo MEY 1, 2020, iyada oo waafaqsan hab-cabbirrada raadraaca iyo talooyinka Maine CDC/DHHS, ayuu Agaasimaha Waaxda Dhaqaalaha iyo Horumarinta Bulshada (DECD) hirgalin doonaa *Qorshaha Dib-u-Bilaabidda*oo u bartimaami doona meheradaha iyo waxqabayada laga yaabo in xaddiyada haatan jira looga beddelo si badbaado leh oo ogggolaanaysa waxqabad dhaqaale iyo shaqsiyeed inay qabsoomaan. Meheradaha iyo waxqabayada la bartimaansaday ayaa heli kara oggolaansho shuruudaysan oo waafaqsan *Qorshaha Dib-u-Bilaabidda*. Oggolaansho kasta oo sidaas oo kale ah ayaa dhici karta in la beddelo iyada oo ku xirnaanaysa xaqiiqada la muujiyay ee xaaladaha ama isbeddellada ama baahiyaha guud ee caafimaadka dadweynaha. Oggolaansho kasta oo sidaas oo kale ah ayaa walibana hoos imanayasa laalitaan ama kala-noqosho

iyada oo ku xiran sida dhab iyo joogto ah u hoggaansanaanta shuruudahaas oo kale. DHHS ayaa u soo saari doonta hagitaan loogu talagalay DECD iyo kuwa kaleba markay tahay nidaamka adeegyada caafimaadka lagu bartilmaansaday *Qorshaha Dib u-Bilaabidda*.

V. KU QARINTA WAJIKA MARADA

Iyada oo waafaqsan hagidda Xarumaha Xakameynta iyo Kahortagga Cudurrada Mareykanka waa inay shaqsiyaadku ku xirtaan maro wajiga qarisa goobaha dadweynaha markay joogaan halkaas oo ay tallaabooyinka kale ee kala fogaanshaha dadku ay adag tahay inay ku hirgasho.

A. **Qeexitaannada.** Ugu talagalka ujeeddooyinka qaybtan, ereyada soosocda ayaa leh macnayaasha soo socda.

1. "Goobaha dadweynaha" waxaa loola jeedaa:

   a. goobaha gudaha ah ee ay marinka u leeyihiin dadweynuhu sida dukaammada raashinka, dukaammada tafaariiqleyda ah, farmasiyada iyo xarumaha daryeelka caafimaadka;

   b. Goobaha dibadda ah sida goobaha carruurtu ciyaarto, goobaha baabuurta la dhigto, iyo aagagga kale e ah sida safafka adeegga la-baxa ah ee dadweynuhu caadi ahaan isugu soo ururaan aag yar; iyo

   c. gaadiidka dadweynaha sida tagsiga, Uber, Lyft, wadaagidda baabuur raaca ama adeeg la mid ah; dooni, bas, ama tareen; iyo joogsadka taraansitka qayb ah deyran ama goobta lagu sugo.

   Loo-shaqeeyayaasha ku sugan goobaha aan badanaaba aysan marin u helin dadweynuhu ayaa go'aamin kara dadka ay tahay inay waji-qariye maro ah gashaddan goobtooda shaqo oo u oggolaan doona shaqaale kasta oo raba inay gashadaan waji dabool inay sidaas sameeyaan.

2. “Shakhsi” waxa loola jeedaa qof kasta oo jooga goobahaas iyada oo aan loo eegin inuu qofku yahay shaqaale, macmiil, iibiye, marti ama qof kaleba.

3. "Ku Qarinta Wejiga ee Marada Ah" ayaa ah difaac qarinaya sanka iyo afka; oo si fiican u le'eg oo aan ciriiri ku ahayn dhinacna wejiga; oo lagu xiro xarko ama goobaab dhegta la galiyo; waxay leedahay lakabyo badan oo maro ah; u oggolaanaya neefsashada iyada oo ayna xaddidin; oo lagu dhaqi karo laguna engejin karo mashiinka iyada oo aan waxyeello loo geysan ama aan la beddelin qaabkeeda.

B. **Arrimaha Ka Reebban.** Ku qarinta wejiga marada ahi uma baahna carruurta ka yar da'da 2, cunugga jooga goobta daryeelka ilmaha, ama qof kasta oo dhibaato ka haysato neefsashada ama xaaladaha caafimaad ee la xiriira, ama haddii kale aan awood u lahayn inuu iska saaro maaskaraha bilaa caawin. Qofka aan gashan karin

maro waji qariye ah xaalad caafimaad darteed looma baahna inuu soo bixiyo dukumenti caafimaad ee xaaladda, waa haddii u Loo-shaqeeyuhu uga baahan karo dukumintiga noocan ah shaqaale marka la raaco sharciga gobolka iyo federaalka.

C. **Wax kale.** Qariyaha wajiga ee marada ahi ma aha ku beddelidda u hogaansanaanta habraaca kala fogaynta bulsheed. Sida ay ku talinayso hagidda CDC ee hadda jirta, maaskarada qalliinka iyo ku neefsiiyeyaasha N-95 ayaa ah agabyo muhiim ah oo si gaar ah loogu hayn doono shaqaalaha daryeelka caafimaadka, gurmadka hore ee caafimaadka, iyo shaqaalaha kale siduu ku talinayo hagidda Federaalka.

VI. TAARIIKHDA FULINTA

Amarkani wuxuu dhaqan galayaa Abril 29, 2020, qaybta V ayaa dhaqan galaya 1da Mey 2020.

_____
Janet T. Mills
Guddoomiye Gobol